



## Wargeyska ku qoran luqadda Isbaanish oo ardayda Latino siiyay cod

Afar sano ka hor ardayda Latino ee dhigata Dugsiga Sare ee Lincoln ayaa go'aansaday in ay u baahan yihiin meel kale oo ay ku muujiyaan aqoonsigooda iyo hidahooda. Iyada oo taageero laga helayo macallinka Luqadda Adduunka/Isbaanishka ee Trevor Todd iyo la taliyayaasha kale, fasalka Revista (oo ah wargeys) ayaa lagu daray manhajka LHS si uu ardayda Latino u siiyo qaab ay ku muujiyaan codkooda iyaga oo adeegsanaya daabacaadda loo yaqaan puño & letra.

“Mashruucan ardaygu abuuray, ardaygu horseedka ka yahay wuxuu cod-baahiye u yahay codadka aan cid matalaysaa aanay jirin,” ayuu sheegay Todd. “Isaga oo hadda bilowday in loo bixiyo magaca Bisha Hidaha Latinx, puño & letra wuxuu xaqiijinayaa aqoonsiga bulsho iyo aragtida dhallinyarada ee luqaddooda gaarka ah.”

Dareenkaas shakhsi ahaaneed waa mid ka muuqda wargeyska oo dhan. Cinwaanka puño & letra waxaa loola jeedaa “qoraalkaaga gacanta ee uu gaarka ah.” Astaantu ‘logo’ waa gacan duuban ‘fist’, oo astaan u ah midnimo iyo wax iska caabin, iyo warqad. Gacanta duuban ‘fist’ ee ku dhex jirta astaanta ‘logo’ waxay cadaadinaysaa/is taabanayaan xarafka kaliya ee u gaarka ah alifbeetada Isbaanisha: ee ñ.

Daabacaad kastaa waxay diiradda saaraysaa hawlaha wargeyska, causa (cadaaladda bulshada), cultura (farshaxanka), iyo travesura (dhaqan xumada). Maqaaladii sanadii la soo dhaafay ayaa waxaa ku jiray mowduucyo kala duwan oo ka hadlayay min muhaajirnimada ilaa laga gaarayo xuquuqda dadka leh jinsiga aan caadi ahayn ‘queer’, min dabaaldegyada dhaqanka ilaa laga gaarayo dhaqanka caanka ah iyo min fadeexada ka dambaysa taco emoji ilaa laga gaarayo qaybaha qosolka leh ee filimka. Ardayda shaqaalaha ee wax qortaa waxay ka kala yimaadeen dhammaan caalamka. Qorayaasha haddu way ka kala yimaadeen, ama xiddido ku leeyihiin, Colombia, México, Honduras, Guatemala, Perú, El Salvador, iyo sidoo kale Maraykanka. Qorayaashii hore ayaa ka kala yimid Chile, Spain iyo Puerto Rico.

Ahaanshaha qoraaga wargeyska ayaa si dabiici ah ugu timaada ardayada sanadkii labaad dhigata ee Aliyah Blank, oo sidoo kale ka tirsan kooxda Dastuurka ee Lincoln. Waxay dareen wanaagsan ka qabtaa muhaajirnimada sababta oo ah hooyadeed waa muhaajir Mexican ah.

“Waa muhiim in dadku fahmaan dhaqamadayada,” ayay sheegtay. “Waxaa jira aragtiyo qaldan oo la aamisan yahay. Dabcan waxaan leenahay waxyaabo aan iskaga mid nahay sida luqadeena, laakiin haddii aad ka soo jeedo Mexico ama Colombia caaddooyinkiina ama dhaqankiinu way kala duwan yihiin sababta oo ah waxaanu ka nimidnay wadamo kala duwan.”

puño & letra ayaa intii muddo la joogtay sii ballaartay, iyada oo hal daabacaad oo la soo saaray sanadkii u horreeyay, laba daabacaad oo la soo saaray sanadka labaad iyo saddex daabacaad oo la hiigsanayay oo la soo saaray sanadkii la soo dhaafay. Wargeyskuu wuxuu daabacaa 1,000 koobi/nuqul halkii mar ee la soo saaro waxaana [laga helaa internet-ka](#). Waxaa loo qaybiyaa ardayda ka tirsan barnaamijka habka waxbarid ee labada luqadood ee Lincoln, macallimiinta Isbaanishka iyo cutubyada MECha (oo ah koox u dhaqdhaqaaqda bulshada oo ka dhalatay dhaqdhaqaaqa xuquuqda madaniga ahaa ee Chicano ee sanadihii 1960-yadii kuwaasi oo kuwo badan oo ka mid ah shaqaalaha wargeysku ka qayb qaataan) meel ka baxsan PPS. puño & letra ayaa sidoo kale ballaariyay dadka uu gaarayo isaga oo wata maqaallo waqtiga la socda oo ka soo muuqda wargeyska [Cardinal Times](#), oo ah wargeyska ardayda ee Lincoln.

Sagarika Ramachandran, oo ah tafaftiraha guud ee Cardinal Times, ayaa sheegtay inuu qiimo leeyahay. “shaqaalaha puño & letra staff waxay hayaan farriimo adag oo ay dadka la wadaagaan, iyada oo wargeyskooduna uuna soo bixin inta badan,” ayay sheegtay. “Wuxuu sidoo kale leeyahay sawirro midabyo badan oo wanaagsan oo ka soo muuqda boggaga.”

Puño & letra wuxuu gelay sanadkiisii afaraad, maamulaha Lincoln ee Peyton Chapman wuxuu rajeynayaa in wargeysku ballaariyo aragtida akhristayaasha. Waxay ku faraxsan tahay awoodda wargeysku ku xoojinayo ardayda suxufiyiinta ah isla markaana gacan uga geysanayo in uu bulshada baro arrimaha ku saabsan isirka iyo dhaqanka.

“Waa wax aad muhiim u ah in la yeesho wargeys ku qoran luqadda Isbaanishka, oo ay qorsheeyeen isla markaana daabaceen arday ku hadasha Isbaanishka si loo maamuuso oo awood loo siiyo dhammaan codadka isla markaana caawimaad looga geysto yareynta kala takoorka waayo-aragnimada iyo aragtiyaha kala duwan,” ayuu sheegay Chapman.